# MADAXA IIAAD

## GUDASHO ISU DHIGANTA

### Qodobka 212aad

Haddii ay suuragal noqon weydo gudashadda dabiiciga ah, deynqabaha waxaa lagu xukumayaa magdhaw dhibaatada ka dhalatay gudasha la'aanta waajibka, taasi waa haddii aan la caddeyn suurtoobid la'aanta gudashadda ka baxsan iraadadiisa. Isla xukunkaas ayaa la dabaqayaa lala daahidda gudashada waajibka.

### Qodobka 213aad

Garsooraha waa u bannaan tahay inuu dhimo qadarka magdhawga, ama in uusan xukumin magdhawga, haddii gefka deynluhu u keenay dhibaatada ama uu siyaadiyey.

### Qodobka 214aad

1. Waa lagu heshiin karaa in deynqabaha xambaaro dhibaatooyinka ka dhasha waxyaabaha u dhaca si lama filaanka ah (caso fortuito) ama quwadda dabiiciga ah ee aan la celin karin (forza maggiore).

2. Waxaa kale oo lagu heshiin karaa in deynqabaha laga xoreeyo mas'uuliyad kasta ee ka timaada gudasho la'aan waajibka heshiiska ah, ayadoo laga reebayo mas'uuliyadda ka timaada khiyaanada ama gefkiisa culus. Hase yeeshee deynqabaha waxaa ka qaadi kara mas'uuliyadda khiyaano ama gef culus dadka uga shaqeeya waajibka gudashadiisa.

3. Wax kama jiraan shardi kasta ee lagu reebayo mas'uuliyadda ka dhalata falka aan bannaaneyn.

### Qodobka 215aad

Ayadoo laga reebayo marka sharcigu qabo si kale, magdhawga wuxuu waajib yahay oo keli ah, markii deynqabuhu la daaho bixinta.

Qodobka 216aad

Deynqabaha wuxuu noqonayaa qof deynta la daahay ayadoo la siinayo digniin ama qoraal la mid ah, taasoo lagu ogeysiinayo jidka boostada, habka uu sheegayo Xeerka Habka Madaniga ama daahidda waxay ku imaan kartaa heshiis caddeynaya in la daahidda ay ku imaaneyso marka ay muddada dhacdo, ayadoo aan loo baahneyn shuruudo kale.

Qodobka 217aad

Digniinta la daahidda looma baahna xaaladaha soo socda :

b) Haddii gudashada waajibka ay noqoto mid aan suurtoobin, ama aan faa'iido lahayn, sabab uu la yimid deynqabaha darteed.

t) Haddii dulucda waajibka ay tahay magdhaw lagu muteystay sabab ka dhalatay fal xaaraan ah.

j) Haddii dulucda waajibka ay tahay celin shey oo uu deynqabuhu ogyahay in la soo xaday, ama shey uu haystay asagoo og in haysashadaasi ahayd mid sharci darro ah.

x) Haddii deynqabaha ku caddeeyo qoraal inuusan dooneyn gudashada waajibka.

Qodobka 218aad

1. Magdhawgu haddii uusan ku qadarneyn heshiiska ama uusan ku caddeyn xeerka, garsooraha ayaa qadaraya, magdhawgu wuxuu ka koobnaanayaa khasaaradii soo gaartey deynlaha iyo faa'iidada dhaaftay, waxaase shardi ah in taasi si caadi ah uga dhalato gudasho la'aan waajibka ama dibu-dhaca gudashadiisa. Dhibaatadda caadiga ah waxey dhalan kartaa markii deynluhu uusan awoodi karin inuu isaga celiyo dhibaatada dadaal la gareysan karo.

2. Hase yeeshee, haddii arrintu ku saabsan tahay waajib heshiiseed, gudasha la'aantana ka imaan khiyaamo ama gef culus ee deynqabaha, magdhawga waxaa lagu ekeynayaa dhibaatadda la fillan karay waqtiga heshiiska la kala saxiixay.

### Qodobka 219aad

1. Magdhawga waxaa ka mid ah xataa kabidda dhibka macnawiga ah. Xaqa kabidda dhibka macnawiga uma gudbayo dad saddexaad, haddii sidaas aan lagu heshiinin si gaar ah, ama uusan ku dhisneyn mowduuciisa dacwad Maxkamadeed.

2. Hase yeeshee, garsooraha waa u bannaan tahay in uu siiyo magdhaw keli ahaan naagta ama ninka is-qaba iyo qaraabada ilaa darajada labaad, ayadoo loo kala badinayo inta ay ka laxawsadeen geeridda qofka.

### Qodobka 220aad

Dhinacyadda waa u bannaan tahay iney horey u xaddidaan qadarka magdhawga ama heshiiska dhexdiisa ama qoraal ka dambeeya ayagoo dhowraya axkaanta qodobadda ka billaabata 212 ilaa 217.

### Qodobka 221aad

1. La muteysan maayo magdhaw heshiiseed, haddii deynqabaha uu caddeeyo in deynluhu dhibaato haba yaraatee eyna gaarin.

2. Garsooruhu wuu dhimi karaa qadarka magdhawga, haddii deynqabaha caddeeyo in si xadgudub ah loo badiyey, ama waajibkii asliga ahaa qaarkiisa la gutey.

3. Wax kama jiraan heshiis kasta ee ka soo horjeeda axkaanta labada qodob ee hore.

### Qodobka 222aad

Haddii dhibaatadu ka badan tahay magdhawgii lagu heshiiyey, deynluhu ma ku dacwoon karo intaas wax ka badan, haddii uu caddeeyo khiyaano ama gef culus ee deynqabaha mooyee.

Qodobka 223aad

Haddii mowduuca waajibka uu yahay qadar lacag ah ee inta ay gaareyso la gooyey waqtiga dacwadda, deynqabaha waxaa waajib ku ah haddii gudashadda uu la daaho in uu siiyo deynlaha, asagoo ugu magdhabaayo dhibaatada uga timid daahidda dulsaar 4% wixii ku saabsan arrimaha madaniga iyo 5% wixii ku saabsan arrimaha ganacsiga, Dulsaarkaasi wuxuu ka billaabanayaa taariikhda dacwadda haddii eyna jirin heshiisyo ama caaddooyin ganacsi oo goynaya taariikh kale. Axkaanta kor ku taal waa la dabaqayaa, haddii eyna jirin axkaan khilaafsan.

Qodobka 224aad

1. Waa u bannaan tahay dhinacyadda in ay goostaan dulsaar kale ha ahaato mid ku saabsan la daahidda gudashada ama xaaladaha kale ee dulsaarka la ogol yahay, waxaase shardi ah in dulsaarkaasi ka badnaanin 7%. Haddii dhinacyaddu ku heshiiyaan dulsaar ka badan, waxaa laga dhigayaa 7%, inta ka badanna waa la celinayaa.

2. Khidmad kasta ama faa'iido nooc kastaba ha ahaatee ee uu saxiixay deynluhu, haddii lagu daro dulsaarka lagu heshiisiyey isku darkooduna ka badan yahay xadka kor lagu sheegay waxaa loo qaadanayaa dulsaar qarsoon oo u suubado in la dhimo, waxaase shardi ah in la caddeeyo in khidmadaasi ama faa'iidadaasi eysan aheyn shaqo run ahaan u jirta ee uu sameeyey deynlaha ama kharaj la gareysan karo.

Qodobka 225aad

Dulsaarka la daahidda ah, ha ahaadeen kuwo sharci ah ama kuwa lagu heshiiyey, deynlaha waa muteysanayaa xataa haddii dhibaato eyna ka soo gaarin daahiddaas awgeed.

Qodobka 226aad

Haddii deynluhu si niyadxumi ku jirto uu ku dacwoodo xaqiisa isagoo dheereynaya muddada dacwada, Garsooraha waxaa u bannaan inuu dhimo dulsaarka sharciga uu qabo ama lagu heshiiyey, ama uusan u ogglaanba dheereynta cudur daar la'aanta ku timid ee dacwadda.

### Qodobka 227aad

Qeybinta qiimaha hantida lala wareegay, deynlayaasha loo oggolaaday in ay ka qeybgalaan xaq uma laha baarinta kaddib dulsaarka daahay ee lacagta iyaga qeyb ahaan ku soo aaday, haddii qofka lagu baaridiyey (aggiducazione) ayna waajib ku ahayn in uu bixiyo dulsaarka qiimaha, ama khasnadda Maxkamadda eyna waajib ku ahayn in ay bixiso dulsaar, kadib markii qiimaha la dhigay Maxkamadda ilaa iyo inta ay ku tartamayaan dulsaarka ay waajib ku noqotay inuu bixiyo qofka lagu baaridiyey ama khasnadda Maxkamadda. Dulsaarkaasi waxaa loogu qeybinayaa deynleyaasha si siman..

### Qodobka 228aad

Deynluhu wuu warsan karaa magdhaw dhameystir ah ee lagu darayo dulsaarka, haddii uu caddeeyo in dhibaatada badani sababteedu tahay niyad-xumi ka timid deynqabaha.

### Qodobka 229aad

Ayadoo sidooda ay u jiraan nidaamyada iyo caaddooyinka ganacsiga, dulsaarka bislaaday laguma muteysto dulsaar, si kastaba ha ahaatee isu geynta tirada dulsaarka ee deynluhu qaadan kara, kama badnaan karaan ra'sumaalka.

### Qodobka 230aad

Dulsaarka ganacsiga ee ku saabsan xisaabta socota, waxey isku beddelayaan hadba canshuurta u degsan meelaha xisaabtaasi ka socota, raasumaaleynta xisaabaadka socda waxaa loo raacayaa hadba sida ay yihiin caaddooyinka ganacsiga.